



# Hagaha xiriirka dadka la xaqiijiyey in ay qabaan caabuuqa coronavirus (COVID-19) ee aan qofka la noolayn

Haddii aad isla qoyska kula nooshay qof qaba astaamaha coronavirus (COVID-19) ama qof loogu heley natijada baaritaanada LFD ama PCR, raac [hagidda qoysasku ay suurtgal ka tahay ama la xaqiijiyay in ay qabaan COVID-19.](#)

Haddii aad xiriir dhow la lahayd, laakiin aadan la noolayn, qof laga helay COVID-19, raac hagaha hoose.

## 1. Maxaa is bedelley?

Talada dadka laga natijada baarista LFD lagaga heley cudurka waa isbedeshay. Loogama baahna inay sameeyaan baaritaan kale oo PCR ah, waana inay guriga joogaan oo ay is-go'doomiyaan isla markaaba.

Dadka natijada baaritaanka LFD lagaga heley cudurka waa inay kaliya sameeyaan baaritaan kale oo PCR ah haddii:

- ay doonayaan in ay codsadaan [Lacag Bixinta Nidaamka Baaritaanka iyo Dabagalka](#)

- ay qabaan xaalad caafimaad oo macnaheedu yahay inay ku habboonaan karaan daawaynta cusub ee COVID-19
- ay qaadanayaan baaritaanka LFD iyada oo qayb ka ah barnamijyada cilmi-baarista ama dabagalka, barnamijkuna waxaa uu waydiisanayaa inay sidaas sameeyaan

## 2. Hagahan yaa loogu talagaley?

Hagahan waxaa loogu talagalay dadka xiriirka la yeeshey dadka laga helay COVID-19. Xiriiradani waxay halis ugu jiraan inay qaadaan COVID-19 laftooda 10ka maalmood ee soo socda iyo inay fayraska u faafiyaan dadka kale, [xattaa hadii aysan wax astaamo ah laheyn](#).

Hagahani waxaa loogu talagalay dadka wada xiriira ee aan gri kula noolayn qofka laga helay COVID-19.

Haddii aad guri kula nooshahay qof leh [astaamaha](#) COVID-19 ama laga helay natijada baaritaanka LFD ama PCR oo cudurka, raac [hagidda Guriga joog: ee goysaska ay suurtagalka tahay ama la xaqijiyyay in ay qabaan COVID-19](#).

Waxaa jira [hage gaar ah oo loogu talagaley kuwa ka shaqeeya goobaha caafimaadka iyo daryeelka bushada](#).

## 3. Astaamaha COVID-19

Astaamaha ugu muhiimsan ee COVID-19 waa inay dhowaan kugu bilowdeen mid ka mid ah kuwa soo socda:

- qufac joogta ah oo cusub
- qandho sareysa
- luminta, ama isbeddelka, dareenka caadiga ah ee dhadhanka ama urta (anosmia)

Dadka intooda badan, COVID-19 wuxuu u noqon doonaa jirro fudud. Si kastaba ha aheetee, haddii aad leedahay astaamo ka mid ah kuwa kor lagu xusey, xattaa haddii ay astaamahaagu yihiin kuwo fudud, joog guriga, soona [qabanqaabso baaritaanka PCR. Uma baahnid inaad qaadatid baaritaanka PCR](#) haddii aad mar hore qaadatay [baaritaanka LFD](#) natijaduna ay ahayd mid lagaa heley.

Waxaa jira calaamado kale oo dhowr ah oo lala xiriirinayo COVID-19. Calaamadahaan waxaa laga yaabaa inay leeyihii sabab kale mana aha kaligood sabab lagu sameeyo baaritaanka COVID-19 ee PCR . Haddii aad ka welwelsan tahay calaamadahaaga, raadso talo caafimaad

## 4. Maxaa loola jeedaa xiriir

Xiriirku waa qof u dhawaa qof laga helay COVID-19. Waxaad la xiriiri kartaa waqtii kasta laga bilaabo 2 maalmood ka hor inta qofka laga helay uusan calaamadaha yeelan (ama, haddii aanay lahayn wax calaamado ah, laga bilaabo 2 maalmood ka hor taariikhda baaritaanka lacaga heley la qaaday) iyo ilaa 10 maalmood ka dib – maadaama ay mudadani tahay xiliga ay cudurka ugu gudbin karaan dadka kale. Qiimayn halista ah ayaa la samayn karaa si arintan loo ogaado, laakiin xiriirku wuxuu noqon karaa:

- qof kasta oo guri kula pool qof kale oo leh astaamaha COVID-19 ama laga helay COVID-19
- qof kasta oo la yeeshay mid ka mid ah noocyada soo socda ee xiriirka qof laga helay COVID-19:
  - xiriirka waji ka wajiga ah oo ayku jирто in lagu qufaco ama in fool ka fool loola sheekeysto iyada oo laysu jiro hal mitir ama wax ka yar
  - la isu jirey hal mitir ama wax ka yar hal daqiqo ama ka badan iyada oo aan waji ka waji lahayn
  - 2 mitir u jirey qof in ka badan 15 daqiqo (ama xiriir hal mar ah, ama marka laysku dardaro hal maalin gudneed)

Qofku waxa kale oo laga yaabaa inuu yeesho xiriir dhow haddii ay gaari ama diyaarad kula socdaaleen isla qof laga helay COVID-19.

Haddii laguu aqoonsaday la xiriir, waxaa lagugu qiimeeyay inaad halis ugu jирто inuu kugu dhaco COVID-19, xitaa haddii aadan lahayn wax astaamo ah. Waxaa lagugu ogeysiin doonaa Nidaamka Baaritaanka iyo Dabagalka ee NHS-ta fariin qoraal ah, email ama taleefoon ama app-ka NHS ee COVID-19, waana inaad raacdaa dhammaan hagida ku jirta dukumiintigan.

Is dhexgalka dhex mara Perspex (ama wax u dhigma) oo lala yeesho qof laga helay COVID-19 inta badan looma tixgeliyo inuu yahay xiriir, ilaa iyo inta aanu jirin xiriir kale sida kuwa liiska sare ku jira.

## 5. Maxaa la sameeyaa haddii aad la xiriirto qof laga helay COVID-19

Haddii ay ku ogaysiyyaan Nidaamka Baaritaanka iyo Dabagalka ee NHS-ta in aad tahay la xiriire qof cudurka looga helay natijada baarista LFD ama PCR ee COVID-19, sharci ahaan waxaa lagaa rabaa inaad guriga joogtid oo aad gooni is-godoomiso ilaa haddii mooyee aad la kulanto mid ka mid ah shuruudaha soo socda:

- aad tahay qof si buuxda u tallaalan Si buuxda u tallaalan macnaheedu waa in aad qaadatey 2 qaadasho oo ah tallaalada la ansixiyey side Pfizer BioNTech, AstraZeneca ama Spikevax (loo aqoon jirey Moderna); waxaad kaloo tahay qof si buuxda u tallaalan haddii aad qaadatey hal qaadasho oo ah tallaalka Janssen ee halka mar la qaato
- ay da'daadu ka yar tahay 18 sanno jir
- aad ka qayb qaadatay ama aad hadda qayb ka tahay tijaabada tallaalka COVID-19 ee la ansixiyey
- aadan awoodin in lagu tallaalo arimo caafimaad awgeed

Haddii aan sharci ahaan lagaa dooneyn in aad is-go'doomiso, waxaad ka raacdaa hagaha hoos ku qoran xiriirada aan looga baahneyn in ay is-go'doomiyaan.

Haddii aad 18 sano jir tahay waxaa laguula dhaqmi doonaa si la mid ah kuwa da'doodu ka yar tahay 18 sanno ilaa da'da 18 sano iyo 6 bilood, si laguugu saamaxo wakhti aad ku noqoto mid si buuxda u tallaalan.

Waxa kale oo laga yaabaa in lagugu ogeysiyo app-ka NHS ee Baaritaanka iyo Dabagalka in aad tahay xiriir la yeeshe qof looga helay natijada baarista LFD ama PCR ee COVID-19. Xaaladdan oo kale waa inaad raacdaa talada lagugu siiyay app-ka.

## 6. Xiriirada si sharci ah looga baahan yahay inay is-go'doomiyaan

Haddii ay ku ogaysiyeen Nidaamka Baarista iyo Dabagalka ee NHS inaad la xiriir la yeelatey qof looga helay natijada baarista LFD ama PCR ee COVID-19, oo aad ka weyn tahay 18 sano oo aanad si buuxda u tallaaneyn, sharci ahaan waxaa lagaa rabaa inaad is-go'doomiso. Arintani ma khusayso haddii aad ka qayb qaadatay ama aad hadda qayb ka tahay tijaabada tallaalka COVID-19 ee la ansixiyay ama aadan awoodin inaad is tallaasho sababo caafimaad awgeed.

Is-go'doominta macnaheedu waa inaad guriga joogtid oo aadan ka bixin guriga. Ha tagin shaqada, dugsiga, ama meelaha dadweynaha, hana isticmaalin gaadiidka dadweynaha ama taksiga. Waxaa jira maclumaaad dheeraad ah oo ku saabsan sida la isu-go'doomiyo kuna taalla dhamaalka hagahan. Bannaanka ha u bixin xitaa si aad u soo iibsato cunto ama waxyaabaha kale ee muhiimka ah, marka laga reebo xaalado gaar ah Jimicsi kasta waa in lagu sameeyaa gudaha gurigaaga, beertaada ama meel bannaan oo gaar ah.

Weydii saaxiibada ama qarabada inay kaa caawiyaan gadashada raashinka, wax iibsiga kale ama qaadashada daawada, ama socodsiinta eeyga. Wuxuu kala codsato inay aad ka dalban kartaa wax iibsigaaga khadka internet-ka iyo daawada oo aad ka dalban karto telefoonka ama khadka. Dareewalada wax keenaa waa inaysan soo galin gurigaaga, markaa iska hubi inaad ka codsato inay alaabta dibadda uga tagaan si looga qaato.

## **6.1 mudo intee leeg ayaan u baahanahay in aan is-go'doomiyo?**

Haddii sharci ahaan lagaaga baahan yahay in aad is-go'doomiso, mudada is-go'doomintaada waxaa ku jira maalintii ugu danbeysey ee xiriirkaaga aad la yeelatey qofka looga heley LFD ama PCR cudurka COVID-19, iyo 10 maalmood oo buuxa oo ku xiga Arintani waxay ka dhigan tahay, haddii, tusaale ahaan,, xiriirkii kuugu dambeeyay ee aad la yeelatey waqtii kasta ee 15-ka bisha muddada is-go'doomintaadu waxay dhammaaneysaa 23:59 ee 25-ka bisha.

## **6.2 Soo qabanqaabso in aad sameyso baaritaanka PCR inta lagu jiro muddada is-go'doominta**

Waxaa lagugula talinayaa inaad u sameyso hal baaritaan oo PCR ah sida ugu dhaqsaha badan marka aad tahay qof is-go'doominaya la xiriire ahaan awgeed. Waa in aad sameysaa baaritaankan PCR sababta oo ah waxaad halis ka sii sareysa ugu sugan tahay in aad caabuqa qaadir. Haddii natijada baaristaada ee PCR ay noqoto mid lagaa heley aritani waxay Nidaamka Baaritaanka iyo Dabagalka ee NHS ka caawin doontaa inay si dhakhso leh ula xiriiraan dadka laga yaabo inay kaa qaadeen fayraska. Kadibna waxaa lagula talin karaa sida ay u ilaalin karaan dadka kale.

Haddii natijada baaritaankaaga PCR inta lagu jiro xilliga is-go'doominta ay tahay mid aan lagaa helin, waa inaad sii waddaa inaad is-go'doomiso maadaama aad weli caabuqa qabi karto oo aad faafin karto una gudbin karto dadka kale. Guriga joog muddadaada is-go'doominta oo shan si aad uga fogaato inaad halis geliso dadka kale.

Haddii baaritaankaagii PCR uu noqdo mid lagaa heley, raac [hagaha joogista guriga](#) ee dadka la heley cudurka COVID-19, bilowna muddo dheerada ah oo is-go'doomin ah. Muddada is-go'doominta cusub waxay kaaga bilaabmaysaa marka aad qaadatay baarista PCR, iyada oo aan loo eegin meesna aad ka joogtey 10kii maalmood ee waqtigaagii is-go'doominta asalka shayd. Arintani waxay ka dhigan tahay in wadarta muddada is-go'doominta ay ka badnaan karto 10 maalmood.

Haddii mar hore lagaa helay COVID-19, waxay u badan tahay inaad heshey xoogaa iska-difaaca ah. Si kastaba ha ahaante, lama dammaanad qaadi karo in qof walba uu yeelan doono difaac, ama inta uu iska-difaacaasi socon doono Waxa suurtogal ah in baaritaannada PCR ay sii ahaadaan kuwo lagaa heley in muddo ah ka dib caabuqa COVID-19.

Haddii aad hore u heshay natijada baaritaanka COVID-19 PCR oo in lagaa heley ah 90-kii maalmood ee la soo dhaafay oo lagugu aqoonsaday inaad tahay xiriir la yeeshe qof qaba COVID-19 waa inaadan iska qaadin baaritaanka PCR ah. Waa in aad sameysaa baaritaanka PCR keliya haddii aad iska heshid mid ka mid ah [astaamaha waaweyn](#) ee COVID-19.

## 6.3 Tixgelinta qoyskaaga marka aad is-go'doomineyso

Haddii si sharci ah lagaaga baahan yahay in aad is-go'doomiso sababta oo ah in aadan si buuxda u tallaalneyn oo aad xiriir la yeelatey qof qaba COVID-19 oo aanad la noolayn, qoyskaaga uma baahna in ay isla kaa go'doomiyaan. Dadka ka tirsan qoyskaaka waa in ay qaataan tallaabooyin taxadar dheeraad ah si ay u raacaan hagaha ku saabsan [sida si badbaado loogu sugnaado loogana caawiyo in la hor istaago faafitaanka COVID-19](#). Aad bay muhiim u tahay in ay raacaan taladan xitaa haddii aad ladnaan dareemayso, waayo astaanuhu waxay qaadan karaan ilaa 10 maalmood inay ka soo muuqdaan xiriirkaagii ugu dambeeyay ee qofka laga helay COVID-19, waxaa na suurtogal ah in la gudbiyo caabuqa xataa haddii aadan lahayn astaamo.

Tallaabooyinkan oo dhan suurtogal ma noqon doonaan haddii adiga, ama kuwa aad la nooshahay, aad qabtaan xaaladdo ay ka mid yihii naafanimo waxbarasho, autism ama jirro maskaxeed oo daran. Fadlan sii raac hagahan sida ugu wanaagsan ee aad kartida u leedahay, adiga oo naftaada iyo kuma lugu dhowba ku ilaalinaya badbaado iyo wanaag, sida ugu haboon ee waafaqsan qorshayaasha daryeelka ee jira.

Joogitaanka guriga muddo dheer waxay dadka qaar ku noqon kartaa mid adag, oo niyad jab iyo cidlo ah Bogga internet-ka ee Hay'adda [Every Mind Matters](#) waxaa ku jira macduumaad iyo talooyin kaa caawinaya si aad u daryeesho caafimaadkaaga maskaxda iyo xaalad-wanaaggaaga.

Haddii laguu aqoonsadey xiriir la yeeshe qof qaba COVID-19 ayna kuu sheegeen in aad is-go'doomiso [Nidaamka Baaritaanka iyo Dabaglka ee NHS](#), ama ay kugula taliyeen in aad sidaas sameyso [NHS COVID-19 app](#), waxaa suurtagal ah in aad xaq u leedahay lacag siin dhan £500 oo ka imaneysa Maamulka Degmadaada iyada oo ku dhisan [Nidaamka Lacag bixinta Baaritaanka iyo Dabaglka](#). Wuxuu kala oo laga yaabaa inaad u qalanto lacagtan haddii aad tahay waalidka ama masuulka ilme loo sheegay inuu is-go'doomyo.

Waa lagu ganaaxi karaa haddii aadan guriga joogin oo aadan is-go'doomin haddii ay ku ogeysiyeen Nidaamka Baaritaanka iyo Dabagalka ee NHS-ta inaad u baahan tahay inaad is-go'doomiso.

## **6.4 Maxaa la sameeyaa haddii aad isku aragto mid ka mid ah astaamaha ugu muhiimsan ee COVID-19 inta lagu jiro xilliga is-go'doominta**

Haddii sharci ahaan lagaa doonayo in aad is-go'doomiso sababta oo ah waxaad tahay xiriir la yeesh qof qaba COVID-19 ayna kugu dhacaan mid ka mid ah kuwa ugu muhsan ee astaamaha COVID-19 xilliga is-go'doominta, joog guriga soona qabanqaabso in aad sameyso baaritaanka PCR.a

Marka ay bilowdaan astaamahaaga, adiga iyo qof kasta oo qoyskaaga ka tirsan waa in ay raacaan Hagaha joogitaanka guriga: Ee loogu talagaley qoyskaaga ay dhici karto ama la xaqijihey in ay qabaan COVID-19. Haddii natijada baaritaanka PCR ay tahay mid lagaa heley, adiga iyo qoyskaaga waa inaad sii wadataan raacitaanka hagida Joogista guriga.

Haddii natijada baaritaankaaga PCR ay tahay mid aan lagaa hellin, markaas waa inaad weli dhammaystirtaa 10ka maalmood ee is-go'doominta, maadaama aad weli sii qaallkarto COVID-19. Sii wad inaad raacdo hagahan.

Haddii qof aad la nooshahay uu yeesho mid ka mid ah astaamaha ugu muhiimsan ee COVID-19 inta lagu jiro muddada is-go'doominta, waxay u baahnaan doonaan inay is-go'doomiyaan oo ay sameeyaan baaritaanka PCR. Adiga iyo qoyskaaga waa in aad raacdaan hagaha joogista guriga.

## **6.5 Calaamadaha ka dib marka ay dhammaato waqtiga is-go'doominta**

Hadii ay kugu dhacdo mid ka mid ah astaamaha COVID-19 ka dib 10ka maalmoodka ee xilliga is-go'doominta dhamaatey, joog guriga, soona qabanqaabso baaritaanka PCR. Haddii natijada baaritaanka PCR lagaa heley, raac hagaha joogista guriga. Waa in aad bilowdaa muddo cusub oo is-go'doomin ah. Arintan waxay ka bilaabaneysa marka ay astaamahaaga bilowdeen

## **7. Xiriirada aan sharci ahaan looga baahnayn inay is-go'doomiyaan**

Haddii aad la xiriirtay qof laga helay COVID-19, sharchiyan lagaagama baahna inaad is-go'doomiso haddii aad si buuxda u tallaalan tahay ama aad ka yar tahay da'da 18 sano jir. Sidoo kale sharci ahaan lagaagama baahna inaad is-go'doomiso haddii aad ka qayb qaadatay ama aad hadda qayb ka tahay tijaabada tallaalka COVID-19 ee la ansixiyay ama aadan awoodin inaad is tallaasho sababo caafimaad awgeed.

Tallaalada COVID-19 waxay yareeyaan halista inaad si xun u jirrato haddii ay kugu dhacdo COVID-19. Haddii lagaa tallaalya COVID-19 weli waad qaadi kartaa oo waad u gudbin kartaa dadka kale, xitaa haddii aadan lahayn wax astaamo ah.

Haddii aad la xiriirtay qof qaba COVID-19 waxaad halis sare ugu jirtaa inaad adiguna qaaddo. Haddii aan si sharci ah lagaaga baahnayn inaad is-go'doomiso, waxaa si koog leh lagugula talinayaa inaad qaadato baaritaanka LFD maalin kasta muddo 7 maalmood.

Baaritaanka LFD waxay aad ugu wanaagsan tahay in laguu aqoonsado dadka qaba heerarka sare ee coronavirus waxayna u badan tahay inay u gudbiyaan caabuqa dadka kale, xitaa haddii aadan lahayn astaamo. Sidaa darteed si adagayaa lagugula talinayaa inaad sameyso baaritaanka LFD ee maalinlaha ah inta lagu jiro muddada aad halista ugu badan ugu jirto inaad adiguna qaaddo.

Haddii aad tahay 5 jir ama ka weyn oo laguu aqoonsado inaad xiriir la leedahay qof qaba COVID-19, laakiin aan sharci ahaan lagaaga baahnayn inaad is-go'doomiso, waxaa si adag laguugula talinayaa inaad:

- iska qaaddo baaritaanka LFD maalin kasta muddo 7 maalmood ah, ama ilaa 10 maalmood laga bilaabo xiriirkii ugu dambeeyay ee qofka laga helay COVID-19 haddii ay arintani horeysey
- samee baaritaanadan maalinlaha ah ka hor intaadan ka bixin guriga marka ugu horeysa ee maalintaas

Haddii ay kugu wargaliyaan Nidaamka Baaritaanka iyo dabagalka ee NHS-ta in aad la xiriirtey qof laga helay COVID-19 laakiin ay awoodi

waayeen inay kuu sheegaan taariikhda aad la xiriirtay qofkan, waa inaad mar kasta iska qaaddaa LFD maalin kasta muddo 7 maalmood ah.

Haddii aad sameysid baaritaanka LFD natijaduna ay tahay in lagaa heley, waa in aad isla markiiba is-go'doomisaa si aad isaga ilaalso in aad cudurka u gudbiso dadka kale, raacna [hagida joogista guriga](#). Waa inaad bilowdaa xilli cusub oo is-go'doomin ah, laga bilaabo taariikhda baaritaanka lagaa heley la qaaday.

Haddii natijadaada LFD ay tahay mid lagaa waayey, waxay u badan tahay inaadan qabin caabuqa waqtiga baaritaanka la qaaday. Si loo sii yareeyo fursadda aad ugu gudbin karto COVID-19 dadka kale, waxaa si adaa laguugula talinayaan inaad:

- xaddidid xiriirkadhow ee aad la yeelaneyso dadka ka baxsan qoyskaaga, gaar ahaan meelaha dadku ku badan yahay, xiran yihiiin ama meelaha hawadu liidato
- ku shaqeyso guriga haddii aad awoodid
- xirataa weji-daboolka meelaha dadku ku badan yahay, xiran ama isu socodka hawadu liidato iyò meelaha aad dadka kale kula xiriirto
- xaddidid xiriirkadhow ee aad la yeelaneyso dadka ka baxsan qoyskaaga, gaar ahaan meelaha dadku ku badan yahay, xiran yihiiin ama meelaha hawadu liidato iyò meelaha aad dadka kale kula xiriirto
- xaddidid xiriirkadhow ee aad la yeelaneyso dadka ka baxsan qoyskaaga, gaar ahaan meelaha dadku ku badan yahay, xiran yihiiin ama meelaha hawadu liidato iyò meelaha aad dadka kale kula xiriirto
- raac hagaha ku saabsan [sida si badbaado leh loogu sugnaado loogana caawiyo in la hor istaago faafitaanka](#)

Raac taladan 10ka maalmood ka dib xiriirkii kuugu dambeeyay ee qofka laga helay COVID-19.

Haddii aad tahay shaqaale caafimaad ama bulsho oo loo aqoonsaday inaad qof xiriir dhow sameeyey lagaana dhaafay is-go'doominta, waxaa jira [hagitaan dheeraad ah oo la heli karo](#) oo ay tahay inaad raacdo si aad u yarayso halista faafitaanka COVID-19 ee goobahan.

Carruurta iyo dhalinyarada da'doodu ka yar tahay 18 sano ee inta badan taga goob waxbarasho ama goob xannaano oo loo aqoonsaday inay yihiiin xiriir dhow waa inay si caadi ah u sii wadaan ka qaybgalka goobta.

Baaritaanada joogtada ah ee LFD lagulam talinayo caruurta da'doodu ka yar tahay 5 sanno jir. Haddii ay la nool yihii qof qaba COVID-19 sharci ahaan loogama baahna inay is-go'doomiyaan, laakiin waa inaad xaddidaa xiriirkka ay la leeyihii qof kasta oo halis sare ugu jira jirro daran haddii uu qabo COVID-19.

Hadii ay kugu dhacdo mid kasta oo ka mid ah astaamaha waaweyn ee COVID-19 waqtii kasta, xattaa haddii ay kuwan yihii kuwo fudud, si degdeg ah isu-go'doomi, soo qabangaabso in aad iska qaadir baaritaan COVID-19 oo PCR ah raacna hagaha dadka qaba astaamaha COVID-19.

## **7.1 Waxay ~~ila~~ tahay in aan xiriir la yeeshay qof laga helay COVID-19, laakiin la iguma ogeysiin oo la igulama talin in aan is-go'doomiyo. Maxaan sameeyaa?**

Xiriirada u baahan inay is-go'doomiyaan ayaa sida caadiga ah lagu wargelin doonaa waxaana lagula talinayaan inay sidaas sameeyaan Nidaamka Baaritaanka iyo Dabagalka ee NHS-ta, oo ay ku jirto NHS COVID-19 app. Haddii aad aaminsantahay in aad la xiriirto qof qaba COVID-19 laakiin aanad wali ku ogaysin nidaamka Baaritaanka iyo Dabagalka ee NHS, waa in aad si taxadar leh u raacdaa hagaha sida si badbaado loogu sugnaado loogana caawiyo in la hor istaago faafitaanka COVID-19. Xaaladahan waxaad diwaarin kartaa inaad iska qaado LFD maalin kasta ah 7 maalmood ama ilaa 10 maalmood tan iyo xiriirkii ugu dambeeyay ee qofka laga helay COVID-19 haddii ay aritani horeysey, xitaa haddii aadan lahayn astaamo. Arintani sababteedu waa in laga yaabaa inaad halis sare ugu ~~jirto~~ in ad caabuqa qadid.

## **7.2 Waxay ~~ila~~ tahay in aan xiriir dhow la yeelatey qof laga baaray COVID-19, laakiin wali ma aysan helin natijada baaritaan ah. Maxaan sameeyaa?**

Haddii aad aaminsantahay in aad la xiriirto qof qaba COVID-19 laakiin aan wali helin natijada, waa in aad si taxadar leh u raacdaa hagaha sida si badbaado loogu sugnaado loogana caawiyo in la hor istaago faafitaanka COVID-19. Waqtigan xaadirka ah, uma baahnid in aad isa sii-go'doomiso.

Xiriirada u baahan inay is-go'doomiyaan ayaa sida caadiga ah lagu wargelin doonaa waxaana lagula talinayaan inay sidaas sameeyaan Nidaamka Baaritaanka iyo Dabagalka ee NHS-ta, oo ay ku jirto NHS COVID-19 app. Haddii aad aaminsantahay inaad la xiriirtey qof qaba COVID-19 laakiin aanay wali ku ogaysiin nidaamka Baaritaanka iyo Dabagalka ee NHS, waa inaad si taxadar leh u raacdaa hagaha [sida si badbaado loogu sugnaado loogana caawiyo in la hor istaago faafitaanka COVID-19](#) ilaa inta laga helayo natijada baaritaankooda.

Haddii aad ka walaacsan tahay inaad qabi karto calaamadaha COVID-19, ama aad la nooshahay qof leh calaamadaha COVID-19, raac [hajidda Guriga joog: ee qoysaska ay suurtagalka tahay ama la xaqiijiyay in ay qabaan COVID-19.](#)

### **7.3 Ku celceladaaafadda gacanta iyo neefsashada oo wanaagsan Gurigaaga hawo wanaagsan lahaado**

Qof kastaa waa inuu ku celeliyaadaaafadda gacanta iyo neefsashada oo wanaagsan

Ku dhaq gacmahaaga saabuun iyo biyo 20 ilbiriqsi ama isticmaal gacmo nadiifiyaha, gaar ahaan qufac hindhisada iyo duufsashada ka dib iyo ka hor intaadan cunin ama qaban cunto. U nadiifi gacmahaaga si joogta ah, kana fogow taabashada wejigaaga.

Afkaaga iyo sankaaga ku dabool tiishyuu marka aad qufaceyso ama aad hindhiseyso. Haddii aadan haysan wax masar ah, ku qufac ama ku hindhis laabatada xusulkaaga, hana ku qufacin gacmahaaga.

Ku tuur tiishyuuga bacda qashinka isla markaana dhaq gacmahaaga.

Meelaha gudaha ku hay in ay hawo wanaagsan lahaato, gaar ahaan meelaha la wadaago. Si aad u kordhiso socodka hawada waxaad sameyn kartaa:

- fur dariishadaha intii suurtogal ah
- albaabada fur
- iska hubi in ay furmaan hawo qaadaha oo socodka hawadu aanay xirmin

- ka tag marawaxadaha soo saara (tusaale ahaan musqulaha) iyaga oo soconaya wax ka badan intii caadiga ahayd iyada oo albaabku xidhan yahay isticmaalka ka dib

Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan yareynta halista COVID-19 ee gurigaaga ka heli kartaa halkan [GermDefence](#).

## **7.4 taageero maaliyadeed ama mid kale oo la taaban karo**

Is-go'doominta waa mid ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee aan sameyn ~~larno~~ si aan u caawino joojinta faafitaanka fayraska oo aan ilaalinno ~~asxaabtayada~~ iyo qoyskayaga, bulshadayada iyo NHS-ta. Haddii aad qabto mid ka mid ah [astaamaha](#) waaweyn ee COVID-19, aad heshay ~~halijada~~ baarista LFD ama PCR oo laga heley cudurka, ama laguu sheegay inaad xiriir la leedahay qof laga helay COVID-19, is-go'doomi waa habka ugu wanaagsan ee lagu dhimi karo halista u gudbinta ~~daalka~~ kale. Haddii laguu sheego inaad is-go'doomiso, waa inaad isla ~~markaaba~~ sidaas samayso. [HOgow taageerada aad heli karto haddii in ku saameeyo COVID-19.](#)

Haddii aad awoodo, weydii ~~asxaabta~~ qoyska ama deriska inay bannaanka u baxaan oo ay kuu keehaan cunto iyo waxyaabaha kale ee muhiimka ah. Haddii aadan haysan ~~daal~~ kale oo ku caawiya, waxaa jiri kara hay'ado samafal ama kooxe bulsheed kuwaas oo ku caawin kara agagaarkaaga ama dukaamada, ~~sugyada~~ iyo jumladlayasha agagaarkaaga ayaa laga yaabaa inay ku bixiyaan adeeg gaarsiinta (taleefanka ama email ahaan).

Hubi in xaafaddaada ama bulshada xaafaddu ay leedatay nidaam tabaruc ah oo kaa caawin kara inay sahay kuu keenaan ama ku siyyaan taageero kale. Weydii saaxiibadaa ama qoyska inay kuu keenaan wax kasta oo aad u baahan tahay ama ka dalbo sahayda khadka internet-ka ama taleefoonka, adiga oo hubinaya in kuwan looga tago gurigaaga banaankiisa si aad u soo qaadato.

Barnaamijka Fal-celiyayaasha Tabaruca ah ee NHS-ta wali waa la heli karaa si ay u caawiyaan kuwa u baahan. Tabarucayaashu waxay ururin karaan oo geyn karaan dukaamaysiga, daawooyinka iyo sahayda kale ee muhiimka ah, waxayna sidoo kale bixin karaan wicitaan saaxiibtinimo oo joogto ah. Wac 0808 196 3646 inta u

dhaxaysa 8 subaxnimo iyo 8 galabnimo, 7 maalmood todobaadkii si aad isugu-gudbiso ama u booqato [NHS Volunteer Responders](#) wixii macluumaa dheeraad ah. Waxaa kale oo laga yaabaa inay jiraan adeegyo kale oo tabaruc ah ama adeegyo bulsho oo degaankaaga ah oo aad ka heli karto taageero.

Haddii aadan awoodin inaad shaqeysa COVID-19 awgeed, eeg hagida [Department for Work and Pensions](#) si aad u ogaato taageerada aad heli karto. Waxa laga yaabaa inaad xaq u yeelato lacag hal mar ah oo ah £500 iyada oo loo marayo [Nidaamka lacag bixinta taageerada ee NHS Baaritaanka iyo Dabagalka](#) haddii lagaaga baahdo in aad guriga joogto ama aad is-go'doomiso. Waxaa kale oo aad xaq u yeelan kartaa lacagtan haddii aad tahay waalidka ama masuulka ilmeed oo sheegay in uu is-go'doomiyo. Waa xaa dalban kartaa Lacag bixinta Taageerada nidaamka baaritaanka iyo Dabagalka NHS [app-ka NHS COVID-19](#).

Waxaad xaq u yeelan doontaa lacagtan haddii aad ku nooshayah England oo Nidaamka NHS ee Baaritaanka iyo Dabagalka ay kuu sheegaan inaad is-go'doomiso, ama App-ka NHS COVID-19 uu kugula taliyay inaad is-go'doomiso.

Waxa kale oo lagaa doonayaan inaad buuxiso dhammaan shuruudaha soo socda:

- inaad shaqaysid ama iskaa u shaqeysatid
- in aadan ka soo shaqayn kartin guriga aadna taas darteed ku waayi doontid dakhli
- in aad codsanayso ugu yaraan mid ka mid ah dhacelaha soo socda:
  - Universal Credit
  - Working Tax Credits
  - income-related Employment and Support Allowance
  - income-based Jobseeker's Allowance
  - Income Support
  - Pension Credit or Housing Benefit

Booqo bogga internetka ee maamulka deegaankaaga si aad u hesho macluumaa dheeraad ah oo ku saabsan [caawinaada iyo taageerada aad heli karto](#).

## **8. Taageerada dheeraadka ah ee maamulka deegaanka ee kuwa hogamiya hab nololeedka reer guuraaga**

Dadka ku nool goobta socotada, baabuur ama doomaha kanaalka waxay u baahan karaan taageero dheeraad ah.

U sheeg maareeyaha goobtaada ama kooxda xiriirka Gypsy iyo Socotada ee deegaanka inay ogadaan haddii aad u baahan tahay taageero dheeraad ah. Haddii aad ku nooshahay webi ama kanaal, ogow talada ay ku siinayso hay'adda maamusha marin-biyoodka aad ku nooshahay, maadaama ay tan ku kala duwan yihin. Isku day inaad telefoonka kula xiriirto intii suurtogal ah si aad uga hortagto ku faafinta fayraska dad dheeraad ah oo aad la xiriirtid.

Haddii aadan heli karu agabyada aasaasiga ah sida biyaha, fayadhowrka iyo qashin qubka, si ay kaaga caawiyaan go'doominta, la xiriir maamulka deegaankaaga si aad u hesho kaalmo. Waxa laga yaabaa inay ku siiyaan tas'hiiad dheeraad ah ama ay kuu diyaariyaan meelo kale oo joogsat ah.

Sharciyada jirta ee ka dhanka ah [xelvo aan la ogolayn](#) ama dhisitaano aan la ogolayn ayaa weli jira

Waa in la sii wadaa in qashinka la asturo iyada oo loo marayo dariiqo la oggol yahay oo sharci ah. Hagaha maamulada deegaanka ee ku saabsan dib u furista ama haynta xarumaha qashinka guriga iyo dib u adeegsiga ayaa la heli karaa. Haddii aad u baahan tahay talo dheeraad ah, la xiriir maamulka degaankaaga.

Haddii aad joogsato ama aad ku safreyso miyiga ama meelaha go'doonsan, u fiirso meesha aad ku sugar tahay haddii aad marayso waddo meelo duur ah ama aad istaagto, gaar ahaan haddii aad xanuun dareemayso. Waaad kale oo isticmaali kartaa app-ka [what3words](#) Haddii ay jirto xaalad degdeg ah oo caafimaad oo aad u baahan tahay si ay adeegyo kuugu yimaadaan.